

Ciwaanka Xeerka: Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha #1225

Waadxa: Patient Financial Services	
Dhageystaha: General	Dib u Eegistii Ugu danbaysay/Taariikhda Muraajacada: 11/3/2023
Qaybta: Patient Care	Qaybta: [RidgeviewClassification]
Waxay qusaysaa laakiin kuma koobna: Revenue & Network Management	
Goobaha: All Locations	

XEERARKA AQOONSIGA/SHARCIYADA:**UJEDADA/YOOLKA:**

Si waafaqsan shaqadeeda bixinta adeegyada tayada sare leh ee caafimaadka iyo faya dhawrka ee bulshada, Ridgeview waxay u taagan tahay siinta caawimaad dhaqaale shaqsiyaadka aan caymiska haysan iyo kuwa caymisku ku yar yahay, kuwaasoo u baahan daawaynta xaalada degdega ah iyo tan caafimaad ahaan muhiimka ah haystana dakhliga qoyska oo buuxinaaya shuruudaha ku saleysan dakhliga.

Xeerkaan wuxuu waafaqsan yahay Heshiiska Garyaqaanka Guud ee Minnesota, 501r, iyo Xeerka Minnesota 144.587 iyo 144.589.

Waxaa intaas dheer, *Lifaaqa A: Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha - Xogta Kooban ee Luuqada* ayaa la raacshay si aad u hesho nuqulka khulaasada ah ee xeerka soo socda wuxuuna ku jiraa Lifaaqa A.

XEERKA:

Caawimaada dhaqaalaha ayaa la baxshaa keliya marka daryeelka loo arko mid caafimaad ahaan muhiim ah iyo kadib marka bukaannada la ogaado inay buuxiyaan dhammaan shuruudaha caawimaada dhaqaalaha. Ridgeview ayaa bixisa caawimaad dhaqaale, ayadoo tixgelinaysa tirada qoyska, dakhliga, qarashka, iyo xaaladaha la soo darsa shaqsiyaada.

Bukaannada doonaaya caawimaada ayaa marka hore laga codsan karaa inay codsadaan barnaamijyada kale ee banaanka (sida Medicaid ama caymis ay ka helaan suuqa caymiska ee dadwaynaha), sida ku haboon, kahor inta aan la go'aamin u qalmida xeerkaan. Waxaa intaas dheer, bukaanno kasta oo aan caymis haysan kuwaasoo la aaminsan yahay inay awood dhaqaale u lahayn inay iibsadaan caymis caafimaad ayaa lagu boorin karaa inay caymis iibsadaan si uu uga caawiyo xaqiijinta helitaanka daryeelka caafimaadka iyo faya qabka guud.

Bukaannada aan caymiska lahayn iyo kuwa aan caymisku ku filnayn ee aan u qalmin qiimo dhimista 100% ayaa heli doona qiimo dhimis ku aadan lacagta uu bukaanku masuulka ka yahay ee adeegyadiisa caafimaad ahaan muhiimka ah ayadoo lagu saleynaayo xogta ku jirta codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ee la Buuxshay. Bukaannada ayaa laga doonayaa inay dhiibaan baaqiga haray ee qarashka daryeelka waxayna kala shaqeyn karaan Wakiiladeena Koontada Bukaanka si ay u samaystaan qorshaha lacag bixinta ayadoo lagu saleynaayo xaaladooda dhaqaalaha.

QEEXITAANNADA:

Erayada soo socda waxaa loo fasirayaa sida soo socota gudaha Xeerkaan:

Charity Care – Qiimaha siinta daryeelka bilaashka ah ama qiimaha jaban shaqsiyaadka aan awoodin inay dhiibaan dhammaan, ama qayb kamid ah qarashkooda isbitaalka ee caafimaadka ayadoo lagu saleynaayo xeerarka u qalmida ee lagu cadeeyay xeerkaan.

Caafimaad ahaan Muhiim ah - Adeegyada isbitaalka ama daryeelka la baxshay, labadaba kuwa bukaan socodka iyo kuwa bukaan jifka, oo la siiyo bukaan si looga baaro, loo xaliyo, loo saxo, loo daweeyo, ama looga hortago bilaabashada ama kasii darista xanuunnada khatar gelinaaya nolosha, abuuraaya sakaraad ama xanuun, abuuraaya burburka ama shaqo gabka jireed, khatar gelinaaya, ama sababaaya naafo, ama xanuun guud ama dhibaato dabo dheeraata.

Daryeelka Xaalada Degdega ah - Daryeelka degdega ah kaasoo muhiim u ah kahortaga gelinta khatarta xun caafimaadka Qiimo dhimistu waxay shaqeynaysaa keliya taariikhda ku qoran: 01/05/2024

Bogga 1 ee 12

[Xogta iyo Hantida Sirta ah ee Ridgeview](#) - Keliya Gudaha ayaa Loo Isticmaali kara

bukaanka, naafo xun oo ku dhacda jirka, iyo/ama cilada xun ee unugyo kasta ama qaybaha jirka.

Daryeelka Degdega ah - Daryeelka caafimaad ahaan muhiimka ah si loo daweeyo xanuunnada caafimaadka ee aan khatar degdeg ah ku ahayn nafta laakiin keeni kara bilowga xanuun ama dhaawac, naafo, geeri, ama naafo daran ama fashil haddii aan la dawayn 12-24 saac gudahood. Daryeel caadiyan lagu baxsho Xarunta Daryeelka Boobsiiska ah.

Aan haysan Caymis - Bukaannada aan haysan caymiska ama caawimaada qolo sadexaad si looga caawiyo bixinta dayntooda dhaqaale ee ay leeyihiin dhakhaatiirtu.

Aan haysan caymiska ku filan - Bukaannada caymiska leh kuwaasoo khayraadooda shaqsiga ah aysan ku filnayn daboolista qarashaadkooda caafimaadka ee ay jeebka ay ka dhiibayaan.

Cadadka Caadiyan La qaado (AGB) - Cadadka caadiyan laga qaado bukaannada caymiska leh marka ay helaan daryeelka degdega ah ama caafimaad ahaan muhiimka ah. Eeg qaybta 2 ee Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha (FAP) si aad u ogaato nooca xisaabta AGB.

Qarashaadka Guud - Cadadka guud ee lacagta ay qaado Ridgeview ee ku baxaysa agabka iyo adeegyada kahor inta aan la bixin wax qiimo dhimisyo ah, gunnooyinka heshiiska, ama lacagaha caymisku jarto ayaa lagu dabaqayaa.

U Qalmida La Qiyaasay - Hanaanka isbitaalku uu ku adeegsan karo go'aannada hore ee u qalmida iyo/ama xogta ka timaada ilaha aan ahayn qofka si loo go'aansho u qalmida caawimaada dhaqaalaha.

Tilmaamaha Heerka Fakhriiga ee Federaalka (FPG) – FPG wuxuu bud-dhig u yahay heerarka dakhliga sanadlaha ah ee fakhriiga sida ay go'aamiso United States Department of Health and Human Services (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka ee Mareykanka) waxaana sanad kasta lagu cusbooneysiisaa Diiwaanka Federaalka.

Qoyska – Ayadoo la adeegsanaayo qeexitaanka Laanta Tira-koobka, koox ka kooban labo qof ama ka badan oo isla nool kuwaasoo wadaaga dhalasho, guur, koriimo, ama loo arko dadka uu masuulka ka yahay qofka canshuur celinta samaynaaya.

Dakhliga Qoyska – Dakhliga qoyska waxaa lagu go'aanshaa in lagu bilaabo qeexitaanka Laanta Tirakoobka, kaasoo adeegsada dakhliga soo socda marka la xisaabinaayo heerarka fakhriiga: Waxaa ku jira lacagaha mushaarka, gunnada shaqo la'aanta, magdhawga shaqaalaha, Social Security, Supplemental Security Income, caawimaada dawlada, lacagaha la siiyo hawlgabka ciidanka, gunnooyinka dadka laga dhintay, gunnooyinka naafada, dakhliga waayeeelka ama hawlgabka, lacagaha dulsaarta ah, qoondooyinka, kirooyinka, lacagaha carbuunta ah, iyo guryaha iyo kaydadka, caawimaada waxbarashada, biilka xaaska hore, taageerada carruurta, caawimaada dhaqaalaha ee ka timaada banaanka qoyska, iyo ilaha kale ee kaladuwan.

- Gunnooyinka Noncash (sida cuntada iyo kaalmaatiga guriyaynta) ayaan loo adeegsan doonin go'aaminta u qalmida.
- Go'aan lagu saleeyay kahor caymiska.
- Kuma jiraan lacagta la faa'iidey ama la qasaaray; iyo
- Haddii qofku la nool yahay qoys, waxaa ku jira dakhliga ka yimaada dhammaan xubnaha qoyska. Carruurta lamaaneyaasha aan isqabin iska dhaleen ee isla nool, dakhliga iyo canshuur celinnada ayaa laga doonayaa labadaba waalidiinta. Dadka aan qaraabada ahayn, sida dadka guriga isla dagan, ayaan loo adeegsan doonin go'aaminta u qalmida.

HABRAACA:

1. U qalmida

Ridgeview ayaan ka qaadi doonin bukaannada u qalma caawimaada dhaqaalaha lacag dheeri ah oo ku aadan daryeelka xaalada degdega ah ama caafimaad ahaan muhiimka ah oo ka badan cadadka caadiyan laga qaado bukaanada caymis leh. Adeegyada u qalma caawimaada dhaqaalaha waxaa ku jira daryeelka xaalada degdega ah ama daryeelka boobsiiska ah, adeegyada ay Ridgeview u aragto inay caafimaad ahaan muhiim yihiin, iyo si guud, daryeelka aan ikhtiyaariga ahayn looguna baahan yahay kahortaga geerida ama xanuunnada xunxun ee ku dhaca caafimaadka bukaanka.

Qiimo dhimistu waxay shaqeynaysaa keliya taariikhda ku qoran: 01/05/2024

Bogga 2 ee 12

Xogta iyo Hantida Sirta ah ee Ridgeview - Keliya Gudaha ayaa Loo Isticmaali kara

Bukaannada aan haysan caymiska ama uusan caymisku ku filnayn lehna qoys hela dakhli dhan ama ka hooseeya 200% FPG ayaa heli kara qiimo dhimis dhan 100%. Shaqsiyaadka hela dakhliga qoyska ee sanadkii oo u dhexeeya 200% iyo 225% FPG ayaa u qalmi doona qiimo dhimis dhan 75%.

Si loogu tixgeliyo caawimaada dhaqaalaha, bukaannadu waa inay kala shaqeeyaan isbitaalka raadinta qaabab kale oo caawimaad haddii loo baahdo, ayna ku jiraan SSI, Naafada, Medicare, iyo Caawimaada Caafimaadka Bukaannada ayaa laga doonayaa inay keenaan xogta iyo dukumiintiyada loo baahan yahay marka ay codsanayaan caawimaada dhaqaalaha ee isbitaalka ama barnaamijyada kale ee qarash bixinta ee gaarka loo leeyahay ama dawlada.

Marka laga soo tago buuxinta codsiga, shaqsiyaadka ayaa laga doonayaa inay keenaan dukumiintiyada soo socda:

- Dhaqdhaqaaqa xisaabta baanka
- Cadeynta dakhliga ee codsada iyo xaaska/qofka kale ee muhiimka ah sida risiidyada mushaarkii ugu danbeeyay, risiidyada lacagta caymiska shaqo la'aanta, ama xogta ku filan ee ku aadan sida bukaannadu ay hadda dhaqaale ahaan isku taageerayaan.
- Cadeynta hantida lacagta ah sida koontooyinka jeega iyo kaydada, istooga, daymanka, cadeynta lacagta hormariska ah, kaydada, iyo koontooyinka lacagta suuqa.
- Nuqulka canshuur celintii ugu danbaysay ee federaalka

Ridgeview ayaa eegeysaa qarashaadka hadda ee masuulka ay ka yihiin bukaannadu marka ay go'aaminayso u qalmida Caawimaada Dhaqaalaha.

Ridgeview waxay eegeysaa hantida lacagta ah. Hantida lacagta ah oo ka badan \$20,000 ayaa loo aqoonsan doonaa inay lamid tahay dakhliga qoyska ee xisaabtaan.

Shaqaalaha Caawimaada Dhaqaalaha ayaa dib u eegis ku sameeya codsiyada lasoo diro kuwaasoo dhimaystiran, kadibna go'aansha caawimaada dhaqaalaha si waafaqsan xeerka Caawimaada Dhaqaalaha. Codsiyo kasta oo aan dhamaystirnayn ayaan la eegi doonin, laakiin codsadeyaasha ayaa la wargelin doonaa lana siin doonaa fursad ay ku soo gudbiyaan dukumintiga/xogta laga doonaayo.

Codsiyada Caawimaada Dhaqaalaha ee ku jira galka ay hayso Ridgeview ayaa la adeegsan doonaa inta lagu jiro sanadka (Janaayo - Diseembar) codsiga lasoo diray. Codsi cusub ayaa loo baahan yahay sanad kasta (Janaayo - Diseembar). Marxaladaha qaarkood, waxaa lagaa codsan karaa inaad markale codsi dirsato sanadka dhexdiisa.

Ilaha banaanka ama dawlada sida cabirka awooda bixinta qarashka ayaa loo adeegsan karaa si loo xaqiijiyo u qalmida.

Marka la go'aaminaayo u qalmida caawimaada dhaqaalaha, Ridgeview ayaan eegin xaaladaha isirka, jinsiga, da'da, dookha galmada, diinta, iyo xaalada bulshada ama soo galootiga.

Ka eeg Lifaafa B: *Tilmaamaha Caawimaada Dhaqaalaha ee Ridgeview* ee heerarka hadda ee Caawimaada Dhaqaalaha oo lagu saleeyay dakhiga iyo tirada qoyska.

2. Go'aaminta Qiimo Dhimista lagu Sameeyo Lacagta Caadiyan la Qaado

Marka u qalmida caawimaada dhaqaalaha la xaqiijiyo, Ridgeview ayaan ka qaadi doonin bukaannada u qalma caawimaada dhaqaalaha lacag ka badan cadadka caadiyan la qaado (AGB) ee bukaannada caymiska leh ee la siiyo daryeelka xaalada degdega ah ama caafimaad ahaan muhiimka ah.

Si loo xisaabsho AGB, Ridgeview ayaa adeegsata qaabka "raad-raaca" ee lagu qeexay 4(b)(2) ee IRS iyo xeerka kama danbaysta ah ee Qasnajiga ee 501(r).

Qaabkaan, Ridgeview ayaa adeegsata xog lagu saleeyay sheegashooyinka loo diray adeegga qarashka ah ee Medicare iyo dhammaan shirkadaha caymiska gaarka loo leeyahay ee ganacsiga ee dhammaan daryeelka la baxshay sanadkii hore si loo go'aanso boqolkiiba wadarta guud qarashaadka caadiyan ay ogol yihiin shirkadahaas caymiska.

Qiimo dhimistu waxay shaqeyneysaa keliya taariikhda ku qoran: 01/05/2024

Bogga 3 ee 12

Xogta iyo Hantida Sirta ah ee Ridgeview - Keliya Gudaha ayaa Loo Isticmaali kara

Boqolkiiba cadadka AGB ayaa intaas kadib lagu dhuftaa wadarta guud ee qarashaadka daryeelka xaalada degdega ah iyo kuwa caafimaad ahaan muhiimka ah si loo go'aansho AGB. Ridgeview ayaa dib u xisaabisa boqoleeyda sanad kasta. Xeerarka 501(r) ayaa ka doonaaya Ridgeview inay u xisaabiso boqoleeyda AGB si gaar ah isbitaal kasta oo ay maamusho.

Ka eeg Lifaaqa C: *AGB ga Ridgeview ee Xarun/Laan kasta* ee qiimo dhimista AGB ee xarun/laan kasta.

Tusaale:

Haddii wadarta guud ee kharashka qaliinka raajada qiimaha ee bukaan socodku uu yahay \$1,000 boqoleeyda AGB guna ay tahay 57%, bukaan kasta oo u qalma caawimaada dhaqaalaha ee xeerkaan ayaan si gaar ah masuul uga noqon doonin bixinta qarash ka badan \$430 oo ku baxaaya baaritaanka raajada xiidmaha ee bukaan socodka.

Bukaannada aan haysan/haysta caymiska ee u qalma caawimaada dhaqaalaha ee tilmaamaha AGB ku cad, qiimo dhimista caymiska/bilaa caymiska ayaa lagu dabaqayaa qiimo dhimista AGB. Tusaale, shirkada caymiska ayaa siisay qiimo dhimis dhan 50% booqashada bukaannada. Bukaanka ayaa loo ogolaaday caawimaada dhaqaalaha ee ku aadan qiimo dhimista AGB dhan 75%. Iskuduwaha Caawimaada Dhaqaalaha ayaa ku dari doona qiimo dhimis dheeri ah oo dhan 7% cadadka lacagta.

3. Codsashada Caawimaada Dhaqaalaha

Nuqullada codsiyada Caawimaada Dhaqaalaha ayay heli karaan dadwaynuhu ayagoo aan laga qaadin wax qarash ah. Xogta ayaa lagu heli karaa qaababka soo socda:

Nuqullada elektarooniga ah ayaa laga heli karaa webseedka Ridgeview oo ah

<https://www.ridgeviewmedical.org/patients-visitors/patient-financial-services/>

Nuqullada waraaqda ah ayaa lagu heli karaa boostada ama si toos ah looga soo qaadan karaa xarunta Ridgeview, ayna ku jiraan goobaha soo socda:

- Ridgeview Le Sueur Campus, 621 South Fourth Street, Le Sueur, MN 56058
- Ridgeview, 500 South Maple Street, Waconia, MN 55387
- Ridgeview Arlington Campus, 601 West Chandler Street, Arlington, MN 55307

Taleefanka:

- Ridgeview adoo wacaaya 952-442-8054 ama 866-286-9840

Codsiyada la buuxshay ayna ku jiraan dhammaan xogta loo baahan yahay iyo dukumiintiyada waa in loosoo diraa Ridgeview si ay u go'aamiso u qalmida:

- Ridgeview Le Sueur Campus, 621 South Fourth Street, Le Sueur, MN 56058
- Ridgeview 500 South Maple Street, Waconia, MN 55387
- Ridgeview Arlington Campus, 601 West Chandler Street, Arlington, MN 55307

Shaqsiaadka su'aalaha ka qaba codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ee Ridgeview; ama doonaaya caawimaad ku aadan buuxinta codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ayaa la xiriiri kara Adeegyad Dhaqaalaha ee Bukaanka ee Ridgeview oo ay ka wici karaan 952-442-8054 ama 866-286-9840.

Saacadaha Caawimaada Dhaqaalaha waa Isniinta ilaa Jimcada, 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo.

Xeerka Barnaamijka Caawimaada Dhaqaalaha ee Ridgeview ayaa si wayn loogu faahfaahshay webseedkeeda, baraha bulshada, bayaanka, waraaqaha, iyo munaasabadaha bulshada.

4. Talaabooyinka la qaadaayo marka Lacagta La Bixin Waayo

Talaabooyinka deyn uruurinta ee Ridgeview ayaa la qaadi karaa haddii codsiga caawimaada dhaqaalaha iyo/ama lacag bixinta aan la helin sida hoos lagu qeexay.

Si kooban, Ridgeview ayaa samayn doonta dedaallo si loo siiyo bukaannada xog ku saabsan xeerkeena caawimaada dhaqaalaha kahor inta aan anaga ama wakiiladeena wakaaladu qaadin talaabooyinka qaar si loo helo qarashka lagugu leeyahay (talaabooyinka waxaa ku jiri kara dacwad madani ah).

Si aad u hesho xog dheeri ah oo ku aadan talaabooyinka Ridgeview ay qaadi doonto si ay ugu sheegto bukaannada bilaa caymiska ah Xeerkeena Caawimaada Dhaqaalaha iyo talaabooyinka dayn uruurinta ee aan samayn karno, fadlan akhri Xeerka Biilka iyo Dayn Uruurinta ee Ridgeview.

Waxaad codsan kartaa nuqulka bilaashka ah ee xeerkaan oo buuxa si toos ah ama inaad codsi boostada ugu dirto Ridgeview 500 South Maple Street, Waconia, MN 55387.

5. U qalmida Qiyaasta ah

Waxaa jira xaalado ay Ridgeview ay si indho ka cabir ah u go'aamin karto in bukaan uu u qalmo caawimaada dhaqaalaha ayadoo lagu saleynaayo go'aaminta u qalmida hore ama buuxinta xaaladaha qaar ee caawimaada dhaqaalaha. Arimaha taageeri kara go'aaminta u qalmida qiyaasta ah waxaa ku jiri kara, laakiin kuma koobna hooy la'aanta; ciwaanka saxda ah ee bukaanka ayaa loo arkaa mid danyar ah ama guri dawladu taageero; u qalmida caafimaadka iyo taariikhda dhaqan galka Caawimaada Dhaqaalaha oo waafaqsan taariikhda adeegga.

Ridgeview ayaa adeegsata Cadeynta Isbadelka Caafimaadka, tilmaan u qalimid, si ay uga caawiso aqoonsiga bukaannada laga yaabo inay u qalmaan caawimaada dhaqaalaha ee lagu baxsho xeerkaan ama barnaamijyada kale ee dawlada ama gaarka loo leeyahay. Shaqaalaha hore iyo adeeg bixiyaasha uruurinta daynta lala goostay ee Ridgeview ayaa adeegsada farsamada u qalmida qiyaasta ah si ay uga caawiso go'aaminta u qalmida caawimaada dhaqaalaha.

Dhammaan bukaannada sida qiyaasta ah loogu go'aanshay inay u qalmaan heer ka yar cadadka ugu badan ee caawimaada lagu heli karo xeerkaan (100% qiimo dhimis ah) ayaa loo sheegi doonaa sida cadadka qiimo dhimista loo xisaabshay waxaana la siin doonaa wakhti ku haboon si ay u codsadaan caawimaad dheeri ah oo dhaqaale.

6. Qiimo dhimista Dadka bilaa Caymiska ah

Bukaanka qaadanaya daawayn aan lahayn caymis sida lagu sheegey heshiiska Ridgeview ee Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ayaa u qalma qiimo dhimis. Bukaannada aan haysan caymiska ama caymiskooda aan la aqoon ayaa heli doona baaritaanka u qalmida inta lagu jiro diiwaan gelinta kahor, diiwaan gelinta, ama hawsha diiwaan gelinta, ama qodobada kale ee ku jira hawsha qarashka iyo uruurinta daynta, sida ku cad Sharciiga Minnesota ee 144.587 subd.2, ayaa heli doona qiimeynta u qalmida 30 maalmood gudahood kadib marka bukaanku helo adeegyada.

U qalmida Qiimo Dhimista:

Bukaannada aan caymiska haysan ayaa la aqoonsan doonaa inta lagu jiro diiwaan gelinta kahor, diiwaan gelinta, ama hawsha isbitaal dhigista, ama xiliyada kale ee hawsha biilka iyo dayn uruurinta. Bukaannada bilaa caymiska ah, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna, dhammaan bukaannada hela dakhliga qoyska oo u dhigma ama kahooseeya \$125,000, oo u qalma qiimo dhimista daawaynta caafimaad ahaan muhiimka ah ayaa u qalmi doona qiimo dhimista dadka bilaa caymiska ah oo u dhiganta heerka qandaraaska lacag bixiyaha ugu sareeya ee Ridgeview.

Ka saarida Qiimo Dhimista:

Bukaannada hela adeegyada isqurxinta, ikhtiyaariga ah, tijaabada ah, ama kuwa kale ee aan caafimaad ahaan muhiimka ahayn ayaan u qalmin qiimo dhimista dadka bilaa caymiska ah.

Qiimo Dhimista Kharashaadka La Dalbaday:

Heerarka Qiimo Dhimista ayaa la dejin doonaa biloowga sanad kasta. Qiimo dhimista waxaa lagu saleyn doonaa heerka caadiga ah ee qarash celinta oo ku cad heshiiska lacag bixiyaha gaarka ah ee ugu sareeya ee Ridgeview ee adeegyada isbitaal.

Ridgeview ayaa xisaabin doonta Qiimo Dhimista Dadka bilaa Canshuurta ah si gaar ah xarumaha soo socda:

Qiimo dhimistu waxay shaqeynaysaa keliya taariikhda ku qoran: 01/05/2024

Bogga 5 ee 12

Xogta iyo Hantida Sirta ah ee Ridgeview - Keliya Gudaha ayaa Loo Isticmaali kara

- Ridgeview Le Sueur Campus
- Ridgeview Waconia Campus
- Ridgeview Arlington Campus

Ka eeg Lifaaqa D: *Qiimo Dhimista dadka bilaa Caymiska ee Ridgeview ee Xarun/Laan Kasta* ee qiimeyaasha hadda ee Qiimo Dhimista Dadka Bilaa Caymiska ah ee xarun/laan kasta.

7. Adeeg Bixiyaasha U Qalma

Marka laga soo tago daryeelka ay bixisay Ridgeview, daryeelka xaalada degdega ah iyo kan caafimaad ahaan muhiimka ah ee ay bixiyaan dhakhaatiirta hoos ku qoran ayaa sidoo kale lagu daboolayaa xeerkan caawimaada dhaqaalaha.

- Orthopedic Institute
- Ridgeview Arlington Campus
- Ridgeview Clinics
- Ridgeview Home Health
- Ridgeview LeSueur Campus
- Ridgeview Waconia Campus
- Western OB/GYN, A Division of Ridgeview Clinics

Daryeelka uu baxsho midkood bixiyaasha hoos ku qoran ee xarunta Ridgeview AYAAN lagu dabooli doonin xeerkaan maadaama aysan u shaqayn Ridgeview. Qarashaadka uu dalbado dhakhtar aan ahayn ururada kor ku qoran AYAAN u qalmi doonin qiimo dhimisyada lagu qeexay xeerkaan caawimaada dhaqaalaha.

- Allina Health
- Bixiyaasha Daryeelka Suuxinta
- Children's Hospitals and Clinics of Minnesota
- Chu Vision
- Consulting Radiologists, LTD
- Cura of Le Sueur
- Edina Eye Physicians & Surgeons
- Interventional Spine and Pain Physicians
- Kottemann Orthodontics
- Lakeview Clinic
- Mankato Clinic
- Mayo Health Systems and Clinics
- Minneapolis Heart Institute® oo kamid ah Ridgeview Heart Center
- MN Oncology
- Northland Counseling Services
- OBGYN West
- Adeeg bixiyaasha kale ee aan ahayn Ridgeview
- Orthopedic and Fracture Clinic
- Park Nicollet Clinic – Pathology
- Quest Labs
- Ridgeview Home Medical Equipment
- South Lake Pediatrics
- Southwest Eye Care
- South Valley Anesthesia, P.A.

Qiimo dhimistu waxay shaqeynaysaa keliya taariikhda ku qoran: 01/05/2024

Bogga 6 ee 12

Xogta iyo Hantida Sirta ah ee Ridgeview - Keliya Gudaha ayaa Loo Isticmaali kara

- St. Francis Health Services – Specialty Clinic
- Sunrise Plaza
- Tailwind Pediatric Dentistry
- Twin Cities Orthopedics
- Two Twelve Surgery Center
- Wayzata Children’s Clinic
- Xygent, Inc

Bukaannada ka walaacsan awoodooda dhiibista adeegyada ama doonaaya inay xog badan ka ogaadaan caawimaada dhaqaalaha waa inay la xiriiraan Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ee Ridgeview oo laga wici karo 952-442-8054 ama 866-286-9840.

Tixraacyada:

Ridgeview**Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha – Soo Koobitaanka Luuqada Fudud**

Xeerka/Barnaamijka Caawimaada Dhaqaalaha ee Ridgeview ayaa loo sameeyay inuu siiyo bukaannada u qalma, qiimo dhimis qayb ah ama buuxda oo ku aadan daryeelka degdega ah ama caafimaad ahaan qasabka ah. Bukaannada doonaaya caawimaada dhaqaalaha waa inay codsadaan barnaamijka, kaasoo hoos lagu soo koobay.

Adeegyada u Qalma – Adeegyada xaalada degdega iyo/ama kuwa caafimaad ahaan muhiimka ah ee ay bixisay Ridgeview, iyo dhamaan rugaha caafimaadka ee ay leedahay Ridgeview. Caawimaada dhaqaalaha ayaa keliya qusaysa adeegyada ay qarashkooda dalbato Ridgeview.

Bukaannada U qalma – Bukaannada helaaya adeegyada u qalma, ee soo gudbiya codsiga buuxa ee Daryeelka Bulshada (oo keena dukumiintiga laga rabo), lana go'aansho inay u qalmaan caawimaad dhaqaale ayadoo la eegaayo tilmaamaha dakhliga ee ku saleysan tirada qoyska.

Sida loo Codsado – Codsiyada Daryeelka Bulshada ayaa lagu heli karaa/lagu buuxin karaa/lagu diri karaa sida soo socota:

- Codsiga kasoo qaado qaybta diiwaan gelinta ee Ridgeview.
- Codso codsi adoo wacaaya Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka oo aad ka helayso 952-442-8054 ama 866-286-9840.
- Codso in codsiga boostada loogu diro Ridgeview, Attn: Patient Financial Services, 500 S Maple St, Waconia, MN 55387.
- Kasoo degso codsiga khaddka tooska ah: <https://www.ridgeviewmedical.org/patients-visitors/patient-financial-services/>

Boostada ugu dir codsiga la buuxshay Ridgeview, Attn: Patient Financial Services, 500 S Maple St, Waconia, MN 55387.

Go'aaminta U qalmida Caawimaada Dhaqaalaha

Si guud, shaqsiyaadka u qalma waxay u qalmaan Caawimaad Dhaqaale, ayagoo adeegsanaaya cabirka kaladuwan, kaasoo dakhliga qoyskoodu yahay ama ka hooseeyo 250% ee Tilmaamaha Heerka Fakhriga Federaalka ee Dawlada Federaalka (FPG); U qalmida Caawimaada Dhaqaalaha, waxay ka dhigan tahay in Shaqsiyaadka u Qalma ay heli doonaan qarashka qayb ahaan ama buuxa ee daryeelka, aana laga qaadi doonin lacag ka badan "Cadadka Caadiyan la Qaado" (AGB) dadka bilaa caymiska ah (AGB, sida ay cadeysay IRS Qaybta 501(r)). Heerarka Caawimaada Dhaqaalaha waxaa lagu saleeyay keliya dakhliga Qoyska FPG, waa:

- Dakhliga Qoyska oo ah 0 ilaa 200% heerka FPG - U qalma 100% oo qiimo Dhimis ah
- Dakhliga Qoyska oo ah 201 ilaa 225% heerka FPG - U qalma 75% oo qiimo dhimis ah
- Dakhliga Qoyska oo ah 226 ilaa 250% heerka FPG - U qalma qiimo dhimista AGB

OGOOW: Haddii uusan jirin dakhliga qoyska oo lasoo sheegay, xogta ayaa laga doonayaa inay muujiso sida kharashaadka maalinlaha ah loo daboolo. Shaqaalaha Caawimaada Dhaqaalaha ayaa dib u eegaaya codsiyada lasoo diray ee dhamaystiran, kadibna go'aaminaaya u qalmida caawimaada dhaqaalaha si waafaqsan Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha. Codsiyada aan dhameystirnayn ayaan la tixgelin doonin, laakiin codsadeyaasha ayaa lagu wargelin doonaa lana siin doonaa fursad ay ku soo gudbiyaan dukumiintiga/xogta laga doonayoo.

La xiriir waaxda Adeegyada Caawimaada Dhaqaalaha ee Ridgeview si ay kuu caawiso ama aad su'aalo u waydiiso. Saacadaha shaqada ee caadiga ah ee shaqadu waa Isniinta ilaa Jimcada, 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo.

Taleefanka: 952-442-8054 ama 866-286-9840

Iimaylka: PFSself.pay@ridgeviewmedical.org

Ridgeview uma soo sheegto daynta dhaqaalaha wakaaladaha daynta mana xadido daryeelka bukaanku heli karo marka ay lasoo daahaan bixinta lacagta.

Qiimo dhimistu waxay shaqeynaysaa keliya taariikhda ku qoran: 01/05/2024

Bogga 8 ee 12

Xogta iyo Hantida Sirta ah ee Ridgeview - Keliya Gudaha ayaa Loo Isticmaali kara

Dadka aan Ku Hadlin Ingiriiska, turjumaadaha Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha, Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha, iyo Khulaasadaan Luuqada Fudud ayaa laga heli karaa barta www.ridgeviewmedical.org/patients-visitors/financial/.

Waxaan ku dhaqanaa sharciyada ay qusayso ee dawlada dhexe iyo gobalka ee madaniga ah, uuna ku jiro Sharciga Xuquuqaha Aadanaha ee Minnesota. Cidna uma takoorayno sabab la xiriirta isir, midab, caqiido, diin, ama wadanka, xaalada guurka, da'da, naafada, dookha galmada, ama galmada.

Aan la Maamujiin

Tilmaamaha Caawimaada Dhaqaalaha ee Ridgeview

Tirada Qoyska	200% FPG Qiimo Dhimis 100%	225% FPG Qiimo Dhimis 75%	250% FPG Qiimo Dhimista AGB ee Xarun Kasta
1	\$29,160	\$32,805	\$36,450
2	\$39,440	\$44,370	\$49,300
3	\$49,720	\$55,935	\$62,150
4	\$60,000	\$67,500	\$75,000
5	\$70,280	\$79,065	\$87,850
6	\$80,560	\$90,630	\$100,700
7	\$90,840	\$102,195	\$113,550
8*	\$101,120	\$113,760	\$126,400

*Qoysaska ka kooban wax kabadan 8 qof, kudar \$10,280 calaa qof kasta oo dheeri ah heerka 200% FPG

Cadadka Caadiyan La Qaado (AGB) ee Ridgeview ee Xarun/Laan kasta

Xarunta/Laanta	AGB Sanadka 2024	Qiimo Dhimista AGB Sanadka 2024
Ridgeview Le Sueur Campus	65%	35%
Ridgeview	37%	63%
Ridgeview Arlington Campus	62%	38%

Qiimo Dhimista Dadka Bilaa Caymiska ah ee Xarun/Laan kasta ee Ridgeview

Xarunta/Laanta	Qiimo dhimista Dadka bilaa Caymiska ah Sanadka 2024
Ridgeview Le Sueur Campus	24%
Ridgeview	51%
Ridgeview Arlington Campus	30%